DEPARTMENT OF HEALTH

# Xuquuqda Daryeelka Guriga ee Federaalka iyo Gobolka oo Isku Dhafan

Waxaa loo isticmaali doonaa bixiyeyaasha ay ansixiyeen Medicare sida uu dhigayo Sharciga Gobolka Minnesota, Qodobka 144A.44, Qaybta 1, **marka laga reebo qoraalka farta madow ku qoran oo matalaya xuquuq dheeraad ah oo macaamiisha ah sida uu dhigayo sharciga federaalka 42CFR 484.50.**

Bixiyaha daryeelka gurigu waa inuu siiyaa macmiilka ama wakiilkiisa ogeysiis qoraal ah oo ku saabsan xuquuqda ka hor taariikhda adeegyada marka ugu horreysa la siinayo macmiilkaas. Bixiyuhu waa inuu sameeyaa dadaal kasta oo macquul ah si uu u bixiyo ogeysiiska xuquuqda luqad uu macmiilku ama wakiilkiisu fahmi karo.

## Qeexitaanno

- Macmiil waxaa loola jeedaa Bukaanka
- Bixiye waxaa loola jeedaa Hay'ad Daryeel Caafimaad oo Guriga ah oo ay ansixisay Medicare (HHA)
- "Wakiil sharci ah" waa qof si sharci ah loo magacaabay ama loo xilsaaray inuu noqdo go'aamiye caafimaad oo bukaanka. Marka aysan jirin caddeyn muujinaysa in bukaanku leeyahay wakiil sharci ah, sida ilaalin, awood qareen oo go'aan caafimaad, ama wakiil caafimaad oo loo magacaabay, HHA waa inay si toos ah u siisaa macluumaadka bukaanka.

## Bayaanka Xuquuqda

Macmiilka iyo wakiilkiisa sharci (haddii uu jiro), ee qaata adeegyada daryeelka guriga ee bulshada dhexdeeda, waxay leeyihiin xuquuqdan, bixiyuhuna waa inuu xaqiijiyaa xuquuqaha soo socda:

1. **Macluumaad qoraal ah oo ku qoran luuqad fudud oo ku saabsan xuquuqda inta lagu jiro booqashada ugu horreysa, iyo ka hor inta bixiyuhu uusan billaabin bixinta daryeelka macmiilka. Ogeysiiska qoraalka ah waa inuu noqdaa mid ay fahmi karaan dadka aqoontoodu ku yar tahay Ingiriisiga, isla markaana u fudud dadka naafada ah,** oo ay ku jirto waxa la sameeyo haddii xuquuqda la jebiyo.
    a. **Haddii maxkamad awood sharci leh oo ku saleysan sharciga gobolka ay go'aamiso in bukaanku uusan lahayn awood sharci oo uu ku gaari karo go'aanno caafimaad, xuquuqda bukaanka waxaa fulin kara qofka ay maxkamaddu u magacawdo inuu u matalo bukaanka.**
    b. **Haddii maxkamad gobol aysan go'aamin in bukaanku uusan lahayn awood sharci oo uu ku gaari karo go'aanno caafimaad sida uu qeexayo sharciga gobolka, wakiilka bukaanka ayaa fulin kara xuquuqda bukaanka.**
    c. **Haddii maxkamad awood leh oo ku saleysan sharciga gobolka ay go'aamiso in bukaanku uusan lahayn awood sharci oo uu ku gaari karo go'aanno caafimaad, bukaanku wuxuu fulin karaa xuquuqdiisa inta uu oggol yahay amarka maxkamaddu.**
2. **Macluumaadka xiriirka ee maamulka bixiyaha, oo ay ku jiraan magaca maamulka, cinwaanka ganacsiga, iyo lambarka taleefanka ganacsiga si loo helo cabashooyinka.**

3. **Ogeysiis afka ah oo ku saabsan xuquuqda iyo waajibaadka macmiilka oo lagu bixiyo luuqadda koowaad ama tan uu doorbido qofku, si uu u fahmi karo, bilaash ah, iyadoo la adeegsanayo turjubaan xirfad leh haddii loo baahdo. Hel saxiixa bukaanka ama wakiilkiisa sharci si loo xaqiijiyo inuu helay nuqul ka mid ah ogeysiiska xuquuqda iyo waajibaadka.**
4. Hel daryeel iyo adeegyo ku saleysan qorshe ku habboon oo casri ah, isla markaana waafaqsan heerarka la aqbalay ee daryeelka caafimaadka, caafimaadka guud ama kalkaalisada, iyo daryeel ku saleysan qofka, iyadoo uu si firfircoon uga qaybqaadanayo horumarinta, wax ka beddelka, iyo qiimeynta qorshaha iyo adeegyada.
5. In lagu wargeliyo ka hor inta aan la helin adeegyada, **iyo xaqa uu u leeyahay inuu ka qayb-qaato, in la siiyo macluumaad, iyo inuu oggolaado ama diido daryeelka ka hor iyo inta lagu jiro daaweynta, marka laga hadlayo:**
    a. Doorashooyin kale oo la heli karo si loo daboolo baahiyaha daryeelka guriga iyo cawaaqibta suurtagalka ah ee ka dhalan karta diidmada adeegyadan.
    b. **Dhammaystirka dhammaan qiimeynada.**
    c. **Daryeelka la bixinayo oo ku saleysan qiimeyn dhamaystiran.**
    d. **Dejinta iyo dib-u-eegista qorshaha daryeelka.**
    e. **Qaybaha xirfadeed ee bixin doona daryeelka.**
    f. **Inta jeer ee booqashooyinka.**
    g. **Natiijooyinka la filayo ee daryeelka, oo ay ku jiraan yoolalka uu macmiilku qeexay, iyo khataraha iyo faa'idooyinka la filayo.**
    h. **Wax kasta oo saameyn kara waxtarka daaweynta.**
    i. Isbeddel kasta oo ku yimaada daryeelka la bixinayo.
6. In horay loogu wargeliyo isbeddel kasta oo bixiyuhu ku talinayo ee qorshaha adeegga, isla markaana uu si firfircoon uga qaybqaato go'aannada ku saabsan isbeddellada qorshaha adeegga.
7. **Hel dhammaan adeegyada ku xusan qorshaha daryeelka.**
8. Diido adeeg ama daaweyn.
9. Ogaado, ka hor helitaanka adeegyada ama inta lagu jiro booqashada ugu horreysa, xaddidaad kasta oo ku saabsan adeegyada uu bixiyo bixiyaha daryeelka guriga.
10. In lagu wargeliyo af ahaan iyo qoraal ahaan, ka hor inta aan adeegyada la bilaabin, kharashaadka uu bixiyuhu ka qaado adeegyada; inta ay le'eg tahay lacag bixinta laga filan karo caymiska caafimaadka, barnaamijyada dadweynaha ama ilo kale oo ay ku jiraan **Medicare iyo Medicaid, ama barnaamij kasta oo kale oo federaal ah oo uu bixiyuhu ogyahay**, haddii la ogyahay; kharashaadka uu macmiilku mas'uul ka noqon karo bixintooda, iyo isbeddel kasta oo ku yimaada **macluumaadka lacag bixinta sida ugu dhaqsaha badan, ka hor booqashada xigta ee bixiyaha. HHA waa inay u hoggaansantaa shuruudaha ogeysiiska bukaanka ee ku xusan 42 CFR 411.408(d)(2) iyo 42 CFR 411.408(f).**
11. Ogaado in ay jiri karaan adeegyo kale oo laga heli karo bulshada dhexdeeda, oo ay ku jiraan adeegyo kale oo daryeel guri iyo bixiyeyaal kale, iyo halka laga heli karo macluumaadka ku saabsan adeegyadan.

12. Si xor ah uga doorto bixiyeyaasha la heli karo, isla markaana uu beddeli karo bixiyaha ka dib marka adeegyada la bilaabo, iyadoo la tixgelinayo xaddidaadaha caymiska caafimaadka, caymiska daryeelka muddada dheer, kaalmada caafimaadka ama barnaamijyada kale ee caafimaadka, ama barnaamijyada dadweynaha.
13. In macluumaadka shakhsiga, maaliyadeed, iyo caafimaad lagu hayo si qarsoodi ah, isla markaana lagu wargeliyo xeerarka iyo habraacyada bixiyaha ee ku saabsan shaacinta macluumaadkan, **oo ay ku jirto ogeysiiska qarsoodiga ee Sadka Macluumaadka ee Natiijada iyo Qiimeynta (Outcome and Assessment Information Set, OASIS) ee dhammaan macaamiisha laga ururiyo xogta OASIS.**
14. Helitaanka diiwaannada macmiilka iyo macluumaadka qoraalka ah ee ka imaanaya diiwaannadaas iyadoo la raacayo Sharciga Diiwaannada Caafimaadka Minnesota, Qodobada 144.291 illaa 144.298.
15. In loo adeego dad si habboon u tababaran oo awood u leh inay gutaan waajibaadkooda.
16. In loola dhaqmo si edeb iyo ixtiraam leh, isla markaana hantida macmiilka loo tixgeliyo si ixtiraam leh.
17. In uu ka xoroobo xadgudub afka ah, **maskaxeed, galmo** iyo jireed, **oo ay ku jiraan dhaawacyo aan la garanayn sababtooda**, dayacaad, ku takri-fal dhaqaale ama si khaldan u isticmaalka hantida, iyo dhammaan noocyada xadgudubka ee uu daboolayo Sharciga Dadka Nugul iyo Sharciga Xadgudubka Carruurta.
18. **In uu helo ogeysiis qoraal ah oo sax ah ka hor inta aan adeeg gaar ah la bixin, haddii bixiyuhu u arko in adeeggaasi aanu daboolnayn, ama ka hor inta bixiyuhu yareynayo ama joojinayo daryeelka socda. HHA sidoo kale waa inay u hoggaansantaa shuruudaha ku xusan 42 CFR 405.1200 ilaa 405.1204.**
19. Ogaado sababta bixiyuhu u joojinayo adeegyada.
20. **In lagu wargeliyo xeerarka iyo habraacyada bixiyaha ee ku saabsan wareejinta iyo ka saarista, luuqad uu macmiilku fahmi karo oo ay heli karaan dadka naafada ah, muddo 4 maalmood oo shaqo gudahood ah laga bilaabo booqashada qiimeynta ugu horreysa. Bixiyuhu wuxuu kaliya wareejin karaa ama ka saari karaa macmiilka haddii:**
    a. **Wareejinta ama ka saaristu ay lagama maarmaan u tahay daryeelka macmiilka sababtoo ah bixiyaha iyo dhakhtarka ama xirfadlaha loo oggol yahay ee masuulka ka ah qorshaha daryeelka ayaa isku raacsan in bixiyuhu uusan mar dambe dabooli karin baahiyaha macmiilka, iyadoo lagu saleynayo xaaladda caafimaad ee macmiilka. Bixiyuhu waa inuu diyaariyaa wareejin ammaan ah oo ku habboon hay'adaha kale ee daryeelka marka baahiyaha macmiilku ka bataan awoodda bixiyaha.**
    b. **Macmiilka ama bixiyaha lacagta ma sii bixin doono kharashaadka adeegyada la bixiyo.**
    c. **Wareejinta ama ka saaristu waa ku habboon tahay sababtoo ah dhakhtarka masuulka ka ah qorshaha daryeelka iyo bixiyaha, ama xirfadlaha loo oggol yahay, ayaa isku raacsan in natiijooyinka la cabbiri karo iyo yoolalka lagu qeexay qorshaha daryeelka sida ku cad §484.60(a)(2)(xiv) (per G458) la gaaray, isla markaana ay isku raacsan yihiin in macmiilku uusan mar dambe u baahnayn adeegyada.**
    d. **Macmiilku wuxuu diidayaa adeegyada ama wuxuu doortaa in la wareejiyo ama laga saaro.**

e. **Bixiyuhu wuxuu go'aamiyaa, iyadoo la raacayo xeerkiisa ku saabsan ka saarista sababeysan ee buuxinaysa shuruudaha qaybtaan, in dhaqanka macmiilka (ama dadka kale ee ku sugan guriga macmiilka) uu yahay mid carqaladeynaya, xadgudub ah, ama aan wada shaqeyn lahayn ilaa heer ay si weyn u saameyso bixinta daryeelka ama awoodda bixiyaha ee shaqo hufan. Bixiyuhu waa inuu sameeyaa waxyaabaha soo socda ka hor inta uusan macmiilka ka saarin sababo awgood:**
    i. **Inuu wargeliyo macmiilka, wakiilka (haddii uu jiro), dhakhaatiirta ama xirfadlayaasha bixiya amarrada qorshaha daryeelka, iyo dhakhtarka daryeelka aasaasiga ah ama xirfadlaha kale ee caafimaad ee masuulka ka noqon doona daryeelka macmiilka ka dib ka saarista (haddii uu jiro), in ka saarista sababo awgood la tixgelinayo.**
    ii. **Inuu sameeyo dadaal lagu xallinayo dhibaatooyinka ka dhasha dhaqanka macmiilka, dhaqanka dadka kale ee ku sugan guriga macmiilka, ama xaaladda jirta.**
    iii. **Inuu siiyo macmiilka iyo wakiilka (haddii uu jiro) macluumaadka xiriirka ee hay'ado kale ama bixiyeyaal kale oo bixin kara daryeel.**
    iv. **Inuu diiwaangeliyo dhibaatooyinka iyo dadaallada lagu xalliyay, isla markaana ku daro diiwaannada caafimaad ee hay'adda.**

f. **Macmiilku uu dhinto; ama**

g. **Hay'adda bixiyaha ay joojiso shaqadeeda.**

21. Ugu yaraan ogeysiis toban maalmood oo jadwal ah ka hor joojinta adeeg uu bixiyo bixiyaha daryeelka guriga. Qodobkani ma khuseeyo xaaladaha soo socda halkaas oo:
    a. Macmiilku ku dhaqmo falal si weyn u beddelaya shuruudaha qorshaha adeegga ee lala leeyahay bixiyaha daryeelka guriga.
    b. Macmiilka, qofka la nool macmiilka, ama dad kale ay abuuraan jawi shaqo oo xadgudub ah ama aan ammaan ahayn oo ku wajahan qofka bixinaya adeegyada daryeelka guriga.
    c. Xaalad degdeg ah ama isbeddel weyn oo ku yimid xaaladda macmiilka ayaa sababay baahiyo adeeg oo ka badan qorshaha adeegga ee hadda jira, kuwaas oo aan si ammaan ah u dabooli karin bixiyaha daryeelka guriga.

22. Wareejin isku dubbaridan marka uu jiro isbeddel ku yimaada bixiyaha adeegyada.

**23.** Cabasho u gudbi shaqaalaha iyo dadka kale ee macmiilku doorto ee ku saabsan adeegyada, **daaweynta ama daryeelka** la bixiyay ama aan la bixin, iyo sidoo kale edeb darro ama ixtiraam la'aan loo muujiyay macmiilka ama hantidiisa, iyo xaqa uu u leeyahay inuu soo jeediyo isbeddello ku saabsan xeerarka iyo adeegyada, isagoo ka madax-bannaan aargoosi, oo ay ku jirto hanjabaadda joojinta adeegyada. **Xaqa in lagu wargeliyo Xarunta** Warbixinta Xadgudubka Dadka Waaweyn ee MN (MAARC), **oo ujeedadeedu tahay inay qabato cabashooyinka, iyo khadka taleefanka bilaashka ah ee caafimaadka guriga ee gobolka, oo ay ku jiraan macluumaadka xiriirka iyo saacadaha shaqada ee su'aalaha ku saabsan bixiyeyaasha maxalliga ah.**

24. Ogaado sida loola xiriiro qof la shaqeeya bixiyaha daryeelka guriga oo masuul ka ah xalinta dhibaatooyinka, iyo in bixiyaha daryeelka gurigu baaro oo isku dayo inuu xalliyo cabashada.

**25.** Ogaado magaca, cinwaanka iyo lambarrada taleefanka ee hay'adaha gobolka ama degmada ee lala xiriiri karo si loo helo macluumaad dheeraad ah ama caawimaad, iyo haddii ay **khuseyso, hay'adaha ay maalgeliso dowladda federaalka ee ka shaqeeya aagga uu macmiilku degan yahay.**

26. Inuu si shakhsi ah u adeegsado xuquuqahan ama uu u oggolaado wakiilkiisa ama qof kale inuu ku matalo, iyadoo aan laga cabsi qabin aargoosi, **isla markaana uu ka xoroobo takoorid ama ciqaab kasta oo ka dhalata adeegsiga xuquuqdiisa ama gudbinta cabashooyinka bixiyaha ama hay'ad kale.**

**27. In lagu wargeliyo xaqa uu u leeyahay helitaanka qalab taageero iyo adeegyada luuqadda iyo sida loo helo adeegyadan.**

**Macluumaadka waa in loo siiyaa bukaannada si luqad fudud ah oo la heli karo isla markaana waqtigeeda ku habboon—**

- **a. Dadka naafada ah, oo ay ku jiraan bogag internet oo la heli karo iyo bixinta qalab iyo adeegyo taageero ah oo bilaash ah, iyadoo la raacayo Sharciga Maraykanka ee Dadka Naafada ah iyo Qodobka 504 ee Sharciga Dib-u-Habaynta.**
- **b. Dadka aqoontoodu ku yar tahay Ingiriisiga iyadoo loo marayo bixinta adeegyada luuqadda oo bilaash ah, oo ay ku jiraan turjumaad afka ah iyo qoraal.**

28. Ku rakibidda qalab kormeer elektaroonik ah goobta macmiilka ama deganaha iyadoo la raacayo shuruudaha gobolka.

## Mas'uuliyadda Bixiyaha

Waxaad dooran kartaa inaad kala hadasho walaac kasta bixiyahaaga. Xusuusin ahaan, bixiyeyaasha waxaa laga rabaa inay ka shaqeeyaan hubinta in xuquuqdaada iyo shuruudaha kale la raaco. Marka bixiyeyaashu jebiyaan xuquuqda ku xusan qaybtaan, waxay mutaysan karaan ganaaxyo iyo tallaabooyin la xiriira shatigooda.

Bixiyeyaashu waa inay sameeyaan waxyaabaha soo socda:

- Dhiirrigeliyaan oo ka caawiyaan adeegsiga ugu ballaaran ee suurtagalka ah ee xuquuqahan.
- Bixiyaan magacyada iyo lambarrada taleefanka ee shakhsiyaadka iyo ururrada bixiya taageero iyo adeegyo sharci oo loogu talagalay macaamiisha iyo deganayaasha doonaya inay adeegsadaan xuquuqdooda.
- Sameeyaan dadaal kasta si ay uga caawiyaan macaamiisha ama deganayaasha helitaanka macluumaad ku saabsan haddii Medicare, kaalmada caafimaadka, barnaamijyada kale ee caafimaadka, ama barnaamijyada dadweynaha ay bixin doonaan kharashaadka adeegyada.
- Sameeyaan fududeymo macquul ah oo loogu talagalay dadka qaba naafonimada isgaarsiinta, ama kuwa ku hadla luqad aan Ingiriisi ahayn.
- Bixiyaan dhammaan macluumaadka iyo ogeysiisyada si luqad fudud ah oo uu macmiilka ama deganuhu fahmi karo.

Ma jiro bixiye ku qasbi kara ama ka codsan kara macmiil ama degane inuu ka tanaasulo mid ka mid ah xuquuqaha ku xusan qaybtaan waqti kasta ama sabab kasta, oo ay ku jirto shuruud lagu bilaabayo adeegyada ama lagu galayo heshiis daryeel nololeed.

## Fasiraadda iyo Dhaqan-gelinta Xuquuqda

Xuquuqahan waxaa loo dejiyay faa'idada macaamiisha helaya adeegyada daryeelka guriga. Dhammaan bixiyeyaasha daryeelka guriga waa inay u hoggaansamaan xuquuqahan. Komishanku waa inuu dhaqan geliyo arrintan. Bixiyaha daryeelka gurigu ma dalban karo ama ku qasbi karo macmiil inuu ka tanaasulo xuquuqahan si uu u helo adeegyada. Bayaankan xuquuqda ma beddelayo ama ma yareynayo xuquuqda iyo xorriyadaha kale ee jiri kara ee la xiriira macaamiisha helaya adeegyada daryeelka guriga, dadka bixiya adeegyadaas, ama bixiyeyaasha daryeelka guriga ee shatiga haysta.

## Kheyraadka

Waxaad la xiriiri kartaa bixiyahaaga shatiga leh sida hoos ku xusan:____________________

Magaca Qofka Shatiga Haysta:____________________

Taleefanka:____________________

Iimaylka:____________________

Cinwaanka:____________________

Magaca iyo jagada qofka loo gudbin karo dhibaatooyinka ama cabashooyinka:____________________

________________________________________

________________________________________

Soo sheeg xadgudub, dayacaad, ama ku takri-fal dhaqaale oo laga shakisan yahay oo ku saabsan qof weyn oo nugul:

**Xarunta Warbixinta Xadgudubka Dadka Waaweyn ee Minnesota (MAARC)**
1844-880-1574
[Adeegyada Ilaalinta Dadka Waaweyn ee Minnesota (https://mn.gov/dhs/people-we-serve/seniors/services/adult-protection/maarc.jsp)](https://mn.gov/dhs/people-we-serve/seniors/services/adult-protection/maarc.jsp)

**Dhammaan cabashooyinka kale** ee aan la xiriirin xadgudub, dayacaad ama ku takri-fal dhaqaale oo qof weyn oo nugul, fadlan la xiriir Xafiiska Cabashooyinka Xarunta Caafimaadka ee Waaxda Caafimaadka Minnesota:

**Xafiiska Cabashooyinka Xarunta Caafimaadk**
(651) 201-4200/1-800-369-7994
health.ohfc-complaints@state.mn.us
Cinwaanka Boostada:
Waaxda Caafimaadka Minnesota
Xafiiska Cabashooyinka Xarunta Caafimaadka
P.O Box 64970
St. Paul, MN 55164-0970

Cabashooyinka iyo su'aalaha ku saabsan HHA-yada maxalliga ah:

**Khadka Taleefanka Bilaashka ah ee Gobolka ee Hay'adaha Daryeelka Guriga ee ay ansixisay Medicare**
Saacadaha Shaqada: Isniin–Jimco, 8:00 subaxnimo – 4:30 galabnimo
Farriin waa la reebi karaa 24 saac maalintii / 7 maalmood usbuucii 24/7
(651) 201-4200/1-800-369-7994

**Si aad u codsato adeegyada u doodista**, fadlan la xiriir Xafiiska Ombudsman-ka ee Daryeelka Muddada Dheer, Xafiiska Ombudsman-ka ee Caafimaadka Maskaxda iyo Naafonimada Horumarka, ama Mid-Minnesota Legal Aid:

**Xafiiska Ombudsman-ka ee Daryeelka Muddada Dheer**
Sanduuqa Boostada 64971
St. Paul, MN 55164-0971
1-800-657-3591 ama 651-431-2555 (metro)
Xafiiska Ombudsman-ka ee Daryeelka Muddada Dheer (https://mn.gov/ooltc/)
MBA.OOLTC@state.mn.us

**Xafiiska Ombudsman-ka ee Caafimaadka Maskaxda iyo Naafonimada Horumarka**
332 Minnesota St.
Qolka W1410, Dhismaha First National Bank
St. Paul, MN 55101-2117
1-800-657-3506 ama 651-757-1800 (metro)
Xafiiska Ombudsman-ka ee Caafimaadka Maskaxda iyo Naafonimada Horumarka (https://mn.gov/omhdd/)
ombudsman.mhdd.@state.mn.us

**Mid-Minnesota Legal Aid / Xarunta Sharciga Naafonimada Minnesota**
111 N. Fifth St.
Qolka 100
Minneapolis, MN 55403
Khadka Qaadashada: 1-877-696-6529
Xarunta Sharciga Naafonimada MN: 1-800-292-4150
Macluumaad: info@mylegalaid.org

**Kheyraad Dheeraad ah**, eeg hoos:

**Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota** (khiyaanada Medicaid iyo arrimaha lacag-bixinta)
Adeegyada Kormeerka iyo Dib-u-eegista Hufnaanta
Sanduuqa Boostada 64982
St Paul, MN 55164-0982
1-800-657-3750 ama 651-431-2650 (metro)
DHS.SIRS@state.mn.us

**Minnesota Aging Pathways / Guddiga Gabowga Minnesota (MBA)** (horay loo yaqaanay Senior Linkage Line)
540 Cedar St.
St. Paul, MN 55155
1-800-333-2433
aging.pathways@state.mn.us

**Xarunta Nolosha Madaxbannaan**
Ka eeg bogga internetka magacyada, cinwaanada, iyo lambarrada taleefanka:
Nolosha Madaxbannaan | Waaxda Shaqada iyo Horumarinta Dhaqaalaha MN (https://mn.gov/deed/job-seekers/disabilities/independent/

**Ururka Hagaajinta Tayada Daryeelka ee Ka-faa'ideystayaasha Medicare iyo**
Qoysaska Commence Health (hore loo oran jiray LIVANTA LLC)
Barnaamijka BFCC-QIO
Commence Health
Sanduuqa Boostada 2687
Virginia Beach, VA 23450
1-888-524-9900, TTY 7-1-1

**Isbahaysiga Tayada Caafimaadka Sare ee Ururka Hagaajinta Tayada (QIO))**
Stratis Health
2901 Metro Drive, Qolka 400
Bloomington, MN 55425-1525
Stratis Health (https://stratishealth.org/)
952-854-3306/1-877-STRATIS (787-2847)
info@stratishealth.org

Waaxda Caafimaadka Minnesota
Qaybta Xeerarka Caafimaadka
P.O. Box 64900
St. Paul, MN 55164-0900
651-201-4200
health.fpc-licensing@state.mn.us
www.health.state.mn.us

2/24/2026

*Si aad ugu hesho macluumaadkan qaab kale, wac: 651-201-4200.*